

## Qiimaynta Saamaynta Caafimaadka – Hordhac

<https://youtu.be/Fe59CxyttNk?feature=shared> (Ingiriisi ku qoran)

Waan ku Salaamay, magacaygu waa Lindsay, waxaana qayb ka ahay kooxda qoraysa Qiimaynta Saamaynta Caafimaadka (ama H-I-Rs). HIR waa qiimeyn gaar ah, oo aan xisbi gaar ah taageerin taasoo adeegsada cadeynta si ay u go'aamiso sida xeer ama soo jeedinta miisaaniyadu u saamayn karto caafimaadka iyo sinaanta Gobolka Washington. HIR-yada ayaa siiya go'aan gaareyaasha xogta gaarka u ah xeerka marka laga eego dhinacyada caafimaadka iyo sinaanta.

Xubin kasta oo kamid ah Baarlamaanka Gobalka ama Gudoomiyaha gobalka ayaa codsan kara HIR, waxaana lagu samayn karaa mawduuc kasta oo xeer kamid ah, marba haddii aan soojeedinta wali loo ansixin sharci ahaan. Waxaa nalaga doonayaa inaan samayno HIR 10 maalmood gudahood inta lagu jiro Kal-fadhiga Baarlamaanka waxaana fursad dheeri ah u haysanaa wakhtigeena marka kal-fadhiga baarlamaanku xirmo.

Xubnaha baarlamaanka yaa codsan kara HIR sababo kala duwan awgood. Qaar kamid ah xubnaha baarlamaanka ayaa adeegsan kara natiijooyinka HIR si ay xog uga helaan saamaynada ka dhalan kara haddii soojeedin sharci ahaan loo ansixiyo, si ay ugala hadlaan soojeedinta xubnaha kale, ama si ay isbadello ugu sameeyaan soojeedin.

Dhammaan HIR-yada la sameeyo ayaa lasoo galshaa webseedka Gudiga Caafimaadka Gobalka.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo [www.sboh.wa.gov/hir](http://www.sboh.wa.gov/hir) (Ingiriisi ku qoran).